JamhuuriyaddaFederaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Xafiiska Guddoonka

Warbixinta Golaha Shacabka Ku Saabsan Kalfadhiga 2-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA.

2dii Maarso – 30kii Juun 2013

Tusmo:

QEYBTA 1AAD: HADALJEEDINTA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA OO KU AADDAN MUNAASABADDA XIRITAANKA KALFADHIGA 2AAD.....3

QEYBTA 2AAD: SOO-KOOBID WARBIXINTA HAWLAHA GOLAHA GUUD AHAAN ...24

QEYBTA 3AAD: HAWLAHA HIRGALAY KALFADHIGA 2-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA 9kii Maarso – 30kii Juun 2013 24

QEYBTA 1AAD: HADALJEEDINTA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA OO KU AADDAN MUNAASABADDA XIRITAANKA KALFADHIGA 2AAD

1 HORDHAC

Xaaladda dalkeennu ku suganyahay waa mid aad u nugul, oo Xaaladdiisa siyaasadeed si isdabajoog ah ayay isu soo beddelaysay, isbedalladaasina sida la saadaalin karo tan iyo mustaqbalka dhow, sidaas ayay maaraynta siyaasadda ku sii socon doonaan. Is rogroggaasina waa sida ka dhacday wadamo badan oo ka mid ah dalalka ka soo baxay dagaallada sokeeye ee daba dheeraaday. Sidaana waxaa ugu wacan waxaa dalka horyaalla arrimo aad u farabadan oo loo bahan yahay in wax laga qabto iyo filashada shacbigu naga sugayo oo aad u sarreysa. Saa daraadeed u hawlgelidda iyo xaqiijinta himmilooyinka shacbiga waa in aan had walba u darbanaanaa qorsho hawleedyada lagu fulinaayona ay noo sii diyaar ahaadaan.

Mahad Allaaleh! Maanta waxaan soo gaarnay gunaanadka kalfadhigeenna 2aad. Kalfadhigeennii 1aad waa mid xusuus mudan, oo wuxuu noogu gebageboobay guul iyo hawlqabad wacan. In kasta oo hawlo badan lasoo qabtay xaalado iyo isbedello dhawr ahna la soo maray, haddana dadka qaarkii baa ka doodi doona in kalfadhigan 2aad aanay jirin wax laga guul gaaray iyo/ama hawlqabad la taaban karo. Muran diidadaas baa sababeysa inaan dib-u-eegid ku sameyno oo aan qiimeyno hawlaha aan soo qabannay iyo horumarka aan gaarnay.

Waxaan u baahanahay inaan eegno wixii aan soo ballan qaadnay oo aan barbar dhigno wixii aan qabanay. Hadii ay jiraan wax aan balanqaadnay oo aan qabsoomin, ama harumarkii la rabay aynaan gaarinna, waxaynu rabnaa inaan ogaanno sida ka duwan sidaan usoo hawlgalnay oo aan u sixi karno geeddisocodkeenna. Waxaase arrimahaas oo dhan ka muhiimsan in aan si qotadheer uga fakarno sida quman ee dalkeenna iyo ummaddeenna u samatabixin lahayn, oo horey loogu sii socodsiin lahaa.

Waxa iyana muhimmad gaar ah leh, Bishani Shacbaan ee aan ku jirno, waa bishii ducaysnayd oo aan ugu diyaar noqoneyno bisha Ramadaan ee barakaysn oo dhawaan innagu soo fool leh. Aan ku Allabarinno sida aan ka barannay Suubane Rasuulkeenna (NNKH): '*Allahuma Barik lana fii Rajab wa Shacbaana wa ballignaa Ramadaan*' – Allahayow nagu barakee oo na bulaali bilaha Rajab iyo Shacbaan, oo Ramadaanna na haleelisii.

2 QODOBO AAN RABO INAAN JALLEECO

Inta aanan gudagelin xogwarranka, ii oggolaada inaan fiirooyin gaagaaban idiin soo gudbiyo.

2.1 KOBCINTA NIDAAMKA IYO WACYIGA QIYAMKEENNA

Golaha Shacabka waa codka Shacabka, waxa la nalaga filayona ma aha keliya inaan shacbiga matilno ee waa in aan hoggaaminnaa oo horseednaa. Saa daraadeed waxaa loo baahan yahay inaan waqti gelino oo qaddarinno kobcinta qiyamka lagama maarmaanka ahe bulshadeenna ku wacyigelino anagana xilgudashadeena nagu haga.

Xiriirka qaybaha kala duwan ee bulshada aan hawl-maalmeedka kula kulmo waxaa iiga soo ifbaxa in dadka qaarba qaarka kale qiyamka ay qaddariyaan ku kala duwan yahay.

Dadka caadiga ah ee aan matalno waxay badanaaba daneynayaan oo ay iga waraystaan: goorta ay haleeli doonaan adeegyada aasaasiga ahe lagama maarmaanka u ah nolosha dadka iyo maxaa inoo qorsheysan oo xaaladdooda nololeed si ka wacan u beddeli doona. Dadka qaarkiisa kalena qiyamka ay qaddariyaan waa xil ii dhiib ama/iyo xoolo isii.

Waxaa lagama maarmaan ah inaan u hawlgalno qorshe wacyigelin ballaaran lagu kobcinayo nidaamka qiyamka iyo inaan u hawlgalno unkidda arrimaha yarayn kara xil iyo xoolo weydiinta, sida falowgelinta waxbarashada agaasiman ee lacag la'aanta, shaqo abuuris iyo adeegyo bulshadeedka si dhakhso leh wax uga beddeli kara nolol-maalmeedka muwaaddinka.

2.2 AWOODDA ISKU FILLAANSHO BUUXA

Khilaafaadka iyo dagaalladii sokeeye ma burburin dhismooyinka guryaheenni oo keliya ee waxay kaloo xaalufiyeen jiritaanka xusuus hay'adeedeedkeenni (institutional memory). Waxaad mooddaa inaan illownay in waa aan dheerayn uu jiray dal iyo shacbi soomaaliyeed oo ku noolaa horumar bulshadeed iyo dhaqaale si joogto u kobcayey. Waan ilownay inaan xowli dheereeya ugu soconnay waddadii isku fillaasho qarameed. Maantase isku fillaasho warkeeda daayoo, waxaan ku sugan nahay xaalad murugeysan oo qabkii nalagu yiqiinay oo aan ku oran jirnay: "Soomaali baan ahay" uu aad u dhaawacmay, haddana badanaaba dibadda iyo dalal shisheeye loo gacan hoorsado.

Miyaanay ahayn xilligii aynu aayaheenna aan gacanta ku dhigi lahayn? In aan u tafaxaydanno oo dhaqaajinno dhaqaale abuurista iyo inaan bulshadeenna horey u marinno, waa arrin goorteedi la gaaray! Mudanyaal aynu u dhaqanno qaab hogaamiye oo aan wax ka qabanno xaaladdan murugada leh ee aan ku dhex sugannahay.

3 MAXAYNU BALLAN QAADNAY?

Si aan u fahamno waxa kalfadhigan 2aad inoo qabsoomay, waxaa inoo fududeyn kara anagoo dib u jalleecno wixii aan fulintooda ku ballanqaadnay xogwarrankii aan kusoo gebogebeynay Kalfadhigii 1aad. Waxa dhici karta in ay jiraan dad ku malo'awaalay in kalfadhigan waxqabadkiisu yar yahay. Waxaan Shacbiga Soomaaliyeed u sheegeynaa in wax ballanbaajis ah uusan jirin. Haddii aan idin xusuusiyo, waxaan soo ballanqaadnay arrimaha soo socda:

- In aan la xiriirino degaannada aan ka soo jeedno iyo bulshada qaybaheeda kala duwan, intii suurtogal ah;
- In Golahani uu noqdo mid u hawlgala xilgudashadiisa, si buuxdana u shaqeeya;
- In la sameeyo barnaamij sharcidejin;
- In la bilaabo Dib-u-eegista Dastuurka;
- In la hormariyo sarraynta sharciga;
- In la dhiso tayada hawlaha iyo hawlqabadka Guddiyada Golaha;
- In heerka hawlwadeennada Golaha sare loo qaado;
- In la kobciyo nabadda, xasilloonida iyo midnimada qaranka.

4 HADABA MAXAA INOO FULAY?

Hawlgal badan oo waqti iyo tabar badan la geliyey ayaa ina soo maray afartii bilood ee ina soo dhaaftay. Waxa aan idinka xogwarramaayona waa arrimihii aan ballanqaadnay waxa inooga qabsoomay.

4.1 METELAADA DEEGAANNADA

- Kulanno badan oo Ururrada bulshada lala yeeshay ayaa qabsoomay sida; dadka naafada, Madax-dhaqameedyada iyo inta la shaqaysa. Marka arintan la eego waxaa muhim inoo ah inaan qoraal ku soo qaadnay cabashadooda ay Curyaamiintu ku soo bandhigeen- in aanay shaqaalaha Ha'adaha qaranka ka helin wax ku filan; dhinacyada jidadka ee la maro oo ay uga baahan yihiin in la dhowro iyo inaanay guud ahaanba helin tixgelintii ay mudnaayeen in lasiiyo;
- Warbixinaha ka yimid Guddiyada iyo Xildhibaannada u kicitimay inay kulanno la soo yeeshaan deegaannada ay ka soo jeedaan waa la noo soo gudbiyey. Arintani, waxan jeclahay inaan mahad uga celiyo kuwa soo gudbiyey warbixinnada Deegaannadooda ay ka soo jeedaan
    - Gobolka Galgaduud: Xildhibaan. Nuur Faarax Jaamac
    - Gobolka Hiiraan: Xildhibaan. Mahad Mohamed Salaad
    - Dawlad Goboleedka Puntland: Xildhibaan. Sacdiya Careys Ciise
    - Shabellada Hoose: Xildhibaan. Cabdullaahi .Sh. Ismaaciil
    - Shabellada Dhexe: Xildhibaan. Daahir Amiin Jeesow

- Gobolka Bay: Xildhibaan. Aweys Cadullaahi
- Gobolka Bakool: Xildhibaan. Aweys Cabdullaahi

4.2 HORUMARINTA IYO TAYEYNTA SHAQADA BAARLAMAANKA

Sida aad garan kartaan shaqada barlamaanka waxaa saldhig u ah hadba waxqabadka, tayada, awoodda iyo khibradda shaqaalaha barlamaanka, maxaa yeelay waxaa ku xiran shaqada barlamaanka oo dhan xilliga la joogo iyo mustaqbalka labadaba.

Sidaas darted, ayaannu u aragnay in ay waajib nagu ahayd inaan aad uga fekerno horumarinta iyo tayenta xoogga shaqo ee barlamaanka. Gaaritaanka hadafkani waa mid waqti dheer iyo maalgelin door ah u baahan; haseyeeshee waxaan goosannay in aan tallaabsanno hadba intii awooddu noo saamaxdo innagoo leh aragti iyo oddoros mustaqbalka inaan gaari doonno shaqo barlamaan oo la mahadiyo.

Muddadii yarayd ee barlamaankani jirey waxaannu isku daynay inaan wax ka baddelno xaaladdii uu ku sugnaa shaqaalaha iyo shaqada barlamaanku markii aan xilka la wareegney, Alle mahaddina waxbaa nooga hirgalay.

Waxaan xoogga saarnay inaan kordhino tayada, tirada iyo waxqabadka shaqaalaha barlamaanka innagoo siinnay mudnaan gaar ah:

- Tababbarka iyo kordhinta shaqaalaha aqoonyahanka ah,
- Dhallinyarada firfircoon oo shaqada loo carbin karo muddo dheerna shaqayn kara iyo
- Kordhinta kaalinta shaqaalaha haweenku ku leeyahay.

Warbixin ku saabsan horumar laga sameeyey tayada aadamiga (human resources) waxay soo jeedinaysaa in shaqaalaha mushaharo fiican la siiyo, aqoontoodana sare loo qaado iyo in shaqaale dhalinyaro ah la qoro. Baarlamaanku waxa uu magacaabay Xoghaye Guud, wuxu qortay dad aqoon u leh Sharciga, Siyaasadda, iyo xirfadley kale si ay gacan uga siiyaan dhinaca farsamada una caawiyaan Guddiyada Baarlamaanka. Baarlamaanku wuxuu shaqo geliyey dhalinyaro jaamiciyiin ah oo tababarro la siiyey si ay Baarlamaanka uga caawiyaan shaqooyinkiisa.

Bishii Agoosto 2012 markii baarlamaanka cusub la dhaariyey shaqaalaha ku qornaa barlamaanka tiradoodu waxay ahayd 52, 36 lab ah (69%) iyo 16 dheddig ah (31%), hase yeeshee bishan juun 2013 tirada shaqaalaha ka shaqeeya barlamaanka waxay gaartey 128, 85 lab ah(65%) iyo 45 dheddig ah(35%). Waxa xusid mudan in tirada shaqaalaha barlamaanku korortay ku dhowaad 60% iyadoo tirada haweenku ay korortay 38%.

Sidoo kale waxaa aad u kordhay tirada dhallinyarada 66% oo isugu jira rag iyo haween. Waxaa iyana kor u kacay tirada aqoonyahanka jaamiciyiinta ah oo rag iyo haweenba leh oo hadda gaartey 40% waxaa sidoo kale isbeddel ku yimid darajooyinka shaqaalaha iyadoo ay aad u korortay shaqaalaha ku jira darajada A/AY.

Intaa oo keli ah kuma koobna hawlaha laga qabtay shaqaalaha waxaase jira hawlo la xiriira tababbarka shaqaalaha, hagaajinta maamulka iyo dibuhaybaynta nidaamka kaydinta xogta shaqaalaha barlamaanka.

Waxa kale oo hadda la wadaa daraasad lagu ogaanayo laguna qiimaynayo baahida shaqaale ee guddiyada iyo gaar ahaan xirfadaha iyo takhasusyada gaarka ah ee ay u baahan yihiin si waxqabadkooda shaqo loo sii hormariyo loona sii adkeeyo oo loogu tababbaro shaqaale leh khibradaha macduunka ah ee guddiyada iyo Barlamaankuba mustaqbalka u baahan karaan.

4.3 DIBU-EEGISTA DASTUURKA

- Dibu-eegista Dastuurka kumeelgaarka ah si rasmi ah ayaa loo furay dhaqaajintiisa
- Guddiga Kormeerka/dabagalka Baarlamaanka ee Dibu-eegista iyo dhaqangelinta Dastuurku waxay noqdeen kuwo sameeya tusaalihii ugu fiicnaa guddiyada hawlgalay,
    - Waxay abuureen Guddi-hoosaadyo (Guddi-hoosaadka qoraallada, Guddi-hoosaadka latashiga dadweynaha, iyo Wacyigeinta, iyo Gudd-hoosaadka Xog ururinta iyo qoraallada);
    - Waxay baarandegis ku sameeyeen qodobbada Dastuurka ku meelgaarka ah iyo xulista qaabka dibu-eegistu isugu xigayaan
    - Waxay dejisteen shintiriska shaqo ee lagu qabanayo howsha Dibu-eegista Dastuurka
    - Waxay bilaabeen akhrinta Dastuurka ku meelgarka ah
    - Waxay asteeyeen mushkiladaha/mowduucyada ku jira Dastuurka Ku meelgaarka ah

4.4 XOOJINTA SHAQADA GUDDIYADA

Waxa kale oo aanu UNDP ka helnay inay naga caawiyaan in tababaro la siiyo Guddiyada Baarlamaanka si ay u gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah oo ay ka mid yihiin: -

- Dhaqangelinta siyaasadda kala xadaynta awoodaha
- Inay kormeeraan hawlaha Xukuumadda
- Qabashada doorka xildhibaanimo ee kaga aaddan dadka uu matelo
- Gaadhsiinta adeegga dadweynaha iyo hawlgelinta muwaadiniinta

- Dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta si loogu helo taageero doodaha dhismaha nabadda iyo dibu-heshiisiinta iyo arrimaha kale ee furaha u ah dhismaha qaranimada dalka
- Guddiyadu waxay hirgeliyeen Xeer-hoosaadkooda, qorshe hawleedkooda iyo miisaaniyad (4biloodle/sanadle)
- Cilmi baadhisyo lagu sameeyo shaqooyinka kormeerka/qiimeynta ee guddiyadu sameeyaan;
- Booqashooyin ay isdhaafsadeen iyaga iyo Baarlamaanada kale ayaa u suurtageliyey inay wax badan ka bartaan
- Wufuud ajanabi ah iyo diblomaasiyiin oo ay dhexmareen aqoon isweydaarsi baaxad leh
- Waxa kale oo ay Guddiyada Baarlamaanku aad uga hawlgaleen: -
- Guddiga joogtada ah oo booqasho ku tagay Oslo, Dalka Norway
- Guddiga dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Warshadaha ee baarlamaanka waxay booqasho indho-indhayna kusoo maareen Dekadda Muqdisho, kulamona ay kula yeesheen maamulka dekedda, waxa kale oo ay guddidu la kulantay Wasiirka Ganacsiga.
- Guddiga difaaca iyo amniga qaranka ee Baarlamaanku waxay iyaguna qabteen doodo ku saabsan “dibu-eegista Amniga qaranka iyo qorshayaasha xasilinta qaranka. Waxa kale oo ay Wasiirka Difaaca uga yeedheen Baarlaamaanka lana weydiiyey su’aalahan soo socda:
- Heshiiska ay kala saxeexdeen Xukuumadda Soomalida iyo Turkiga ee dhinaca difaaca.
- Tababarrada ciidanka Milateriga iyo qalabkooda.
- Tirada ciidanka diiwaan gashan
- Xeerka lagu qaato ciidammada Xogoga dalk a
- Ku xadgudubka xuquuda aadanaha ee ay ciidammadu geystaan
- Guddiga Xuquuqda aadanaha, Haweenka, iyo arrimaha aadaminnimadu waxay ku qabteen Hoteel City Palaza Siminaar hal maalin ah oo ay ku samaynayeen wacyi gelinta Xuquuda aadanaha. Siminaarkan waxa ka soo qayb galay qaybo Ururrada bulshada ka mid ah, qareenno, qaybo haweenka ah, Culumaa’u diin, Madax-dhaqameed, Dhallinyaro iyo dad loo geysto ku xadgudub dhanka xuquuqdooda aadaminimo
- Guddiga Garsoorka iyo Arrimaha Diinta waxay iyaguna ka qaybgaleen kulan lagaga hadlayey dibu-habeynta Garsoorka oo lagu qabtay magaalada Muqdisho April 2013. Kulanka waxaa soo xaadiray Ogaalleyda Sharciga iyo Hogaamiyeyaasha dhaqanka. Kulankaasi waxay guddigu la tashi kula yeesheen aqoonyahanno kala duwan kana codsadeen inay ra’yigooda ku darsadaan dibu-eegista iyo horumarinta qodobbada Garsoorka ee Dastuurka. Waxayna ka soo qaybgalayaasha ka heleen ra’yi kordhin iyo talobixin intaba.

- Guddiga Xuquuqda aadanaha, Haweenka, iyo arrimaha aadaminimadu waxay kormeer ku tageen Xabsiga dhexe ee Muqdisho waxaanay u kuur galeen nolosha Maxaabiista. Guddigu waxay soo ogaadeen in Saddex-dalool hal ka mid ah Maxaabiistu ay weli garsugayaal yihiin iyagoo xabsiga ku xidhan mudo bilo ah
- Guddiga Warfaafinta & warbaahinta, Wacyigelinta bulshada, Dhaqanka, Boostada iyo isgaarsiinta iyaguna way howlgaleen. Waxay ku martiqaadeen Baarlamaanka hay'adaha warbaahinta kuwa madaxabanaan iyo kuwa gaarka loo leeyahayba. Waxaanay kala hadleen doorka ay warbaahintu ku leedahay Xukunka sharciyeed, nabadgelyada iyo amniga. Kulankaasi ka soo qaybgalayaashu waxay uga warameen Guddiga khatarta ay shaqadoodu leedahay iyo sida aanay dhanka Xukuumada uga haysan wax difaacooda kufilan
- Sawir kooban hadaan idinka siiyo xowliga ay u hawlgaleen 15ka Guddi ee Golaha Shacabka, waxaa u qabsoomay wadar ahaan Guddiyada 214 kulan Guddi oo rasmi ah intii uu socday kalfadhiga labaad ee u dhaxeysay bishii Maarso iyo Juun. Sidoo kale kormeerrada iyo hawlaha u kuurgalidda ee ay Guddiyadu ku tageen goobaha adeegyada bulshadu ka socoto ee Dowladda wadar ahaan waa 50 kormeer hawleed iyagoo warbixinno rasmi ah uga soo diyaariyey Golaha.

4.4 KORMEER/DABAGAL XUKUUMADEED OO XOOGAN

- Wasiirka kowaad ee xukuummaddu khudbad uu ka akhriyey Baarlamaanka wuxuu daaha kaga rogay qorshaha Xukuumadiisa;
- Waa markii ugu horreysey muddo 20 sanadood ah ee Baarlamaanku ansixiyo qorshe Miissaniyadeed iyadoo guddigga Golaha ugu xilsaaran arrintaa shaqo fiican oo masuulnimo ku dheehantahay ay ka qabteen.
- La shaqaynta Xukuummadda/Fulinta ayaa si togan loo bilaabay iyada oo ay Guddiyada Goluhu wadar ahaan 49 kulan oo la xisaabtan iyo u kuurgalid ah la yeesheen Wasiirrada iyo xafiisyada ay isku shaqada yihiin, iyagoo warbixinno rasmi ah ka soo diyaariyey hadba meesha ay u marayso fulinta qorshe-hawleedkooda
- Fahamka ka faa'iidaysiga Su'aalaha ayaa furmay oo la isticmaalay ku dhaqankooda.
- Tiro Hindise sharciyeedyo ah ayaa Xukuumaddu soo gudbisey. In ka badan 40 Sharcina waa la sumadeeyey. Waxay xildhibaannadu uga doodeen 30% fadhiya doodii kalfadhigan hindise-sharciyeedyo ay marsiiyeen akhrinta koowaad iyo akhrinta labaad iyadoo Guddiyada qaarkood ay soo diyaariyeen warbixinadoodii hindiseyaashaas si ay ugu gudubto akhrinta saddexaad.
- Hadda hawlaheenna oo dhami waxay u socdaan si xawli ah xukuumadduna waxay la timid wada shaqayn ka fiican tii kalfadhigii hore iyo xiriir shaqo oo wanaagsan

- Horumar la yaab leh ayaa ka qabsoomay nidaamka xisaabtanka fadhiga guud ee Baarlamaanka iyadoo Goluhu si furan su'aal-wadareed ugu waydiiyey mas'uuliyiinta laanta fulinta iyagoo diirradda saaraya hadba arrimaha shacbigu daneynayo inay wax ka ogaadaan.

Waad igu raaci doontaan markaan lahaa inaannu Baarlamaanka wax ku filan qaban, sababtuna ay tahay inaan jeclaan lahayn in wax intaas ka sii badan aan qabano. Run ahaantiina, ilaahay fadligiisa wax badan baa la qabtay si wacanna waa loo qabtay. Waxaynu guul ka gaarnay dhammaan wixii aan qorshaysanay inaan qabano. Maashaa Allah! Waa inaad si fiican ugu istareexdaan horumarka la gaadhay.

5 AAN QIIMAYNO WAXQABADKEENA

5.1 XOOJINTA SHAQADA BAARLAMAANKA

Sida ku cad lifaaqa dadaal weyn ayaan ku bixinnay horumarinta iyo tayenta shaqaalaha barlamaanka maxaa wacay hawlaha aan wadno dhammaantood waxay ku soo dhammaadaan shaqaalaha. Haddii aan helno shaqaale aqoon, khibrad iyo daacadnimo leh waxaa noo suurtagelaya inaan shaqo wanaagsan qabanno. Waa arrintaas waxa aan xoogga u saarnay annagoo hayna hawshii xeerdejinta inaan horumarinno xoogga shaqeeya ee Barlamaanka.Alle mahaddi waxaan ka gaarney natiija fiican innagoo kordhinney tirada iyo tayada shaqaalaha barlamaanka. Si gaar ah waxa kordhay tirada aqoonyahanka, dhallinyada iyo haweenka ka shaqeeya barlamaanka taas oo ah hadaf aan beegsaneyney.

Inkasta oo shaqaalayn iyo tababaro badan aan samaynay, haddana weli waxaan u baahanahay inaan hawlgelinno kooxo dad ah oo cusub iyo in fursad loo siiyo inay iyagu lafahooda isugu fill`aadaan markaana aan waxqabadkooda dhab ahaan ugu qiimayno. Culayska kale ee na haystaa wuxuu yahay in weli Baarlamaankeennu u baahan yahay in si fiican loogu qalabeeyo agabkii ku haboona iyo in loo dhiso dhismayaashii ku haboonaa kaasoo weli qaadan doona waqti.

5.2 SHAQADA GUDDIYADA

Inkastoo shaqada Guddiyadu hawlahooda si fiican u bilaabmeen, waxase jira goobaha qaarkood oo u baahan in si taxadar leh mudnaanta la siiyo.

5.2.1 SOO XAADIRIDA OO LIIDATA

Xubno badan oo ku jira barlamaanka ayaa si joogto ah u soo xaadira shaqada barlamaanka iyo tan guddiyada haddii loo baahdana qabta wixii shaqo dheeraad ah ee looga maarmi waayo. Xildhibaannadaas heeganka ah waan bogaadinayaa waana u hambalyeynayaa, waana sidaas waxa qof walba oo xil u qaaday ummadda sida laga doonayo gaar ahaan innaga oo ku soo aadney marxaladan adag ee dalkeennu marayo.

Hase yeeshee, waxa nasiib darro ah, wax in laga xumaadona ah in soo xaadiritaanka liitaahi dhaawac u geysato firfircoonidii iyo shaqadii Guddiyada badankooda. Tani waxay laangadhe ka dhigtay horusocodkii waxaa kaloo wax laga xumaada ah in arrintani caado iska noqotay, taasoo wiiqday nidaamka Barlamaanka waana in si dhaqso ah loo joojiyo

5.2.2 KOR-JOOGID/DABAGAL XOOGAN

Sida aan soo sheegnay wax badanbaa la qabtay guddiyaduna dadaal badanbay galeen siday u korjoogteyn lahaayeen hay'adda fulinta. Kormeerradaaas la sameeyeeyey waxaa kasoo baxay waxyaabo in si gaar ah dhugmo loogu yeesho ay tahay si mustaqbalka xisaabta loogu darsado oo loo saxo khaladaadka ka imaan kara labada dhinac.

Hase yeeshee, Waxaa jirta baahi cad oo loo qabo in la helo tababarro dheeri ah oo ku saabsan sida loo sameeyo Kor-joogid iy o maamulidda xidhiidhka ka dhexeeya Hay'adaha Fulinta iyo Sharcidejinta. Iyadoo korjoogidda loo marayo dariiqa uga habboon, waa inaanay noqon mid u dhacda qaab muran dhalisa oo abuurta xaalad cakiran oo aan loo baahnayn

5.3 XEER-HOOSAADKA BAARLAMAANKA

Xeer-hoosaadkeennu waa inuu ahaado mid u taagan in si joogto ah dibu-eegid loogu sameeyo si aan u xaqiijinno inaan maamulka Baarlamaanka shaqadiisa aan u wadno waddada ugu qiimo badan. Waxa jira meelo u baahan in muhimmad la siiyo ee la xiriirta

- Hordhac, meelmarinta iyo laalidda mooshinnada;
- Habka anshaxmarinta looga qaadayo Xubnaha Baarlamaanka
- Interpellation

6 SIDEE HOREY LOOGU SOCONAYAA?

Ka Baarlamaan ahaan Dhowr arrimood ayay tahay inay innagu hagaan inaan dalkan horey u marino, waxaanay kala yihiin: -

6.1 INAAN MUUJINNO HOGAAMIN

Waxaa loo baahan yahay inay xubnaha baarlamaanku gartaan inay leeyihiin masuuliyadda ah inay dalka u hogaamiyaan sidii ay uga saari lahaayeen xaaladda uu marxaladan ku jiro una hagaan mustaqbal aan dhammaanteen u wada hanweynahay, si tani loo suurtageliyo, waxaynu u baahanahay inaan aqbalno inaynu innagu leenahay masuuliyadda aan ku hogaaminayno dadkeenna, si kastaba ha ahaatee, tani dhici mayso mana dhici doonto ilaa aan nimaadno hogaan lagu dayan karo, waa inaynu u dhaqannaa nidaam ay daku u hanweyn yihiin oo ay

da'yarteenuna jeclaystaan.waa inaynu muujinno hogaamin. Goor walba, waa inaynu baraaruggeeda lahaanno in dadka Soomaaliyeed ay ina eegayaan ishana inagu hayaan sida aan u dhaqmayno.

6.2 MEELAHA XOOGGA LA SAARAYO

(a) ***Mideysnaanta Fikirka iyo waxqabadka****;*

Waxaan u baahanahay inaan xoogga saarno sidaan fakirkeenna ugu jihayn lahayn in dalka aynu horey u dhaqaajino. Kuma gaari karno taasi inaynu ahaanno kuwo kala qaybsan oo mushkilad dhexdooda ka abuura goor walbana isku mashquulsan.

(b) Ilaalinta Nidaamka Baarlamaanka iyo Shuruucda Qaranka;

Waa inaynu sidoo kale ka taxadirnaa ku xadgudubka nidaamka Baarlamaanka si aan meel u gaarno, markastana ahaano tusaale lagu dayan karo

(c) Muujinta Inaan u qalanno Matillaada Shacabka;

Waa inaynu xoogga saarno, sidii aan uga dhabayn lahayn ka baarlamaan ahaan inaan nahay codkii shacabka, muujinnana isku duubnaan, mataalad dhab iyo ka warqabka shacabka.

(d) Kormeer tayo iyo hufnaan leh;

Inaan kormeer waxku ool ah ku samayno hay'adda Fulinta, isla markaana uu noqdo kormeerkeenu mid hufan oo ka maran dhaliil iyo danaysi, u adeegaya danta qaranka una qalma sharafta baarlamaanka

(e) Soo saariadda Shuruuc dalka horey loogu marin karo;

Waa inaan mar kasta diyaar u ahaano soo saaridda shuruuc dalka horey loogu marin karo oo tayo leh, una adeegta danta guud iyo horumarinta dalka, sidoo kale waxaa muhiim ah inaan ku dhaqaaqno meel marinta shuruucda baarlamaanka loo soo gudbiyo si looga baaraandego.

(f) Milicsashada Kalfadhiga nagu soo aadan;

Qaybta shaqo ee ugu muhiimsan kalfadhigeenna soo socda waxay noqon doontaa hubinta in shuruucda mudnaanta leh oo dhami ay diyaar inoo ahaadaan. Shuruucdaas la'aantood, ma awoodi karno inaynu dhisno hay'ado xukuumadeed oo cusub oo leh awood wanaagsan oo maamul, taasoo keeni karta dhisidda Qaanuun sharciyeed iyo in horey loogu talaabsado horumar fiican

(g) ANSHAXA - (KALA-DAMBAYN)

Si aan guul u gaarno, waxaan u baahanahay in la muujiyo kala-dambayn, arrintani Guddiga Joogtada ah waxay u xilsaaran tahay hubinta inaan talaabo macno leh oo ka dhan ah Xildhibaannada ku guuldarraysta inay gutaan waajibaadkooda Baarlamaaniga ah. Waana inaynu xataa dibu-eegid ku samayno Xeer-hoosaadka meelihii loo baahdo

6.3 GUNNAADKA;

Dhowaanahan, waxaan fursad u helay in aan dhegegeysto dadweyne kala duwan oo wax ka tabanaya habka aynu u shaqayno. Sidaa daraaddeed waxaan ku baaqayaa bal in aynu nafteenna si dhab ah u qiimeyno.

SANNADKI AMBAQAADIDDA GEEDDISOCDKA KA BOGSASHADA UTUMIHI COLAADDA

WA BILLAHI TOWFIIQ

Shax* lamb (*1)

FALANQEYNTA XAALADDA SHAQAALAHA B.F. SOOMAALIYA
Oktoobar 2007 – Juun, 2013

Shax lamb.(1): ee hoos ku tilmaaman, waxay muujineysaa in shaqaalaha ka howlgalayey B.F.Somaaliya bilihii Oktoobar,2007 ilaa Agoosto, 2012 ay ahaayeen 52 qof oo keliya oo isugu jiray 36(69%) oo lab ah, dheddigguna uu ahaa 16(31%). Dhinaca kale , waxaa xusid mudan in shaqaalaha ku soo biiray Baarlamaanka F.Soomaaliya bilihii Sebtembar,2012 ilaa juun, 2013 ay tiradoodu iyaguna gaartay 76 qof oo 47(62%) ay lab yihiin, dheddiguna noqday 29(38%).

Dhinaca kale, tirakoobtu waay daaha ka rogeysaa in guud ahaan tirada ka shaqeysa imminka (Juune 2013) B.F. Soomaaliya ay tahay 128 qof oo 83 (65%) lab yihiin iyo 45 (35%) oo ah dheddig, kuwaasoo dhammaantood ah kuwa soo maray, soona ansixiyay shaqaaleyntooda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (Civil Service Commission).

Dadaalkas iyo kobaca shaqaalaha Baarlamanka F.Soomaaliya ku yimid muddadii u dhexeeysay Sebtember,2012 ilaa Juun, 2013 waa (59%) halka ay ka yihiin shaqaalaha la qoray ka hor bisha Agoosto, 2012 (41%) oo ah goorta uu Baarlamaankani uu xilka la wareegay.

Shax lamb (1) : Shaqaalaha joogtada ah ee B.F.S. oo u kala baxsassn Sannadihii shaqada loo

qoray iyo jinsiga (Lab iyo Dhiddig) **(Oktoobar2007 – Juun,2013).**

Tix Lamb.	Sannadihii Shaqada La qoray Shaqaalaha	Tirada		Isugeyn	%
		Lab	Dheddig		
1.	Oktoobar, 2007 –Agoosto,2012	36 (69%)	16 (31%)	52 (100%)	41%
2.	Sebtembar,2012 –Juun, 2013	47 (62%)	29 (38%)	76 (100%)	59%
Wadar		83 (65%)	45 (35%)	128 (100%)	100%

Xigasho: waxaa isku duway Tirakoobtani Kooxda La-talinta Farsamda ee Kheyraadka Aadamiga ee BFS (Juun 2013)

Shax lamb.(2): ee hoos ku xusan, waxay muujineysaa da'da shaqaalaha ka howlgala B.F. Soomaaliya, kuwaasoo guud ahaan 66% ay yihiin kuwa da'dooda u dhexeysa (15-39 jir), halka ay 30% ay yihiin kuwa da'dooda tahay (40-59 jir). Dhinaca kale, 4% oo kaliya ay da'dooda tahay 60 jir iyo wixii ka sarreeya. Tirakoobtani waxay caddeyneysaa in cududda shaqaalaha ee ka howl-gala B.F.Soomaaliya intooda badan ay yihiin:-

a) Kuwo ku soo biiray shaqada muddada Sebtembar,2012 ilaa Juun, 2013 kuwaasoo da'dadooda ay tahay inta uu dhexeysa 15-39 jir, una dhigmaan 59% marka loo eego shaqaalaha guud ee ka shaqeeya Barlamaanka F.S.
b) Kuwa u baahan tababarro kala duwan si ay si wax ku ool ah u hantaan howlaha baaxadda weyn ee Baarlamaanka F.S. laga filayo waqtiyada soo socda.
c) Waxaa xusid mudan, in 4% oo kaliya ee Shaqaalaha ka howlgala Baarlamaanka F.S. ay da'dooda tahay 60 jir iyo wixii ka weyn, halkaasi waxaa ka muuqata in shaqaalahu ay khibraddu ku yar tahay, taasina waa midda keentay in la qoro Shaqaale jaamiciyiin ah oo tiradooda kor u dhaafeysa 40 qof, kuwaasoo imminka uu u socodo tababarro la xiriira howlaha kala duwan ee B.F.S. uu u xilsaaran yahay.

Shax lamb.(2): Tirada shaqaalaha joogtada ah ee B.F.Soomaliay oo u kala baxsan xagga da'da **(Oktoobar 2007 – Juun 2013):**

Tix Lamb.	Muddada/Xilliga	Da'da			Isugeyn	%
		15-39	40-59	60+		
1.	Oktoobar 2007 –Agoosto,2012	29	20	3	52	41%
2.	Sebtembar,2012 –Juun, 2013	56	18	2	76	59%
Wadar		85 (66%)	38 (30%)	5 (4%)	128 (100%)	100%

Xigasho: waxaa isku duway Tirakoobtani Kooxda La-talinta Farsamda ee Kheyraadka Aadamiga ee BFS (Juun 2013)

Shax lamb. (3): ee hoos ku qoran, waxay faahfaahineysaa heerarka aqoonta ee Shaqaalaha joogtada ee Baarlamaanka F.S. ee ku soo biiray shaqada muddadii u dhexeysay Oktoobar,2007 – Agoosto, 2012 in ay kala yihiin : heerka D/ga H/Dhexe (12%), Dugsiga Sare (16%) iyo Jamici (13%), halka Shaqaalaha Baarlamanka F.S. loo qoray muddadii u dhexeysay (Sebtembar,2012 ilaa Juun, 2013) ay kala yihiin D/ga H/dhexe (18%), D/ga sare (1%) iyo Jaamici (40%).

- Dhinaca kale, Shaqaalaha sare ku xusan jinsi ahaan, waxay kala yihiin guud ahaan: lab (65%), dheddiguna (35%) oo qiyaas ahaan ku dhaw kala bar shaqaalaha guud ee B.F.Soomaaliyeed ka howl gala.
- Waxaa xusid mudan in Jaamiciyiinta bishii Agoosto, 2012 ka hor ay ahaayeen oo kaliya (13%), halka ay ka ahaayeen 40% kuwii la shaqaaleysiiyay muddadii u dhexeysay Sebtembar, 2012 - Juun 2013, halkas waxaa ka muuqata in Guddoonka Barlamaanku uu xoog saarayo qorista Shaqaalaha aqoonta sare leh, si kor loogu qaado tayada iyo waxqabadka Baarlamaanka F. Soomaaliya waqtigan xaadirka ah oo uu marayo marxalado kala guur ah oo u baahan shaqo adag oo tayeysan.
- Waxaa kaloo Guddoonku Tixgelin weyn siiyay qorista haweenka/hablaha si loo muujiyo kaalinta haweenk/hablaha iyo nasiibkooda shaqada.Gaar ahaan waqtiga/xilligan lagu jiro.

Shax lamb. (3): Shaqaalaha Joogtada ah ee Baarlamaanka F.Soomaaliya oo u kala baxsan xagga Heerarka Aqoonta iyo Jinsiga (Lab iyo Dhiddig).

(Oktoobar, 2007 – Juun 2013).

Tix Lamb	Heerka Aqoonta	Sannadihii Shaqada La qoray Shaqaalaha	Tirada		Isugeyn	%
			Lab	Dheddig		
1.	D/ga H/Dhexe (30%)	Oktoobar 2007 - Agoosto,2012	6	9	15	12%
		Sebtembar,2012 –Juun, 2013	-	24	24	18%
2.	D/ga Sare	Oktoobar 2007 - Agoosto,2012	17	3	20	16%

	(17%)	Sebtembar,2012 –Juun, 2013	-	1	1	1%
3.	Jaamici (53%)	Oktoobar 2007 - Agoosto,2012	13	4	17	13%
		Sebteembar,2012 –Juun, 2013	47	4	51	40%
Wadar Guud			83 (65%)	45 (35%)	128 (100%)	100 %

Xigasho: waxaa isku duway Tirakoobtani Kooxda La-talinta Farsamda ee Kheyraadka Aadamiga ee BFS (Juun 2013)

Shax lamb (4): waxay muujineysaa shaqalaaha joogtada ah ee jaamiciyiinta ah /aqoonyahanka ah oo darajadooduna tahay(A/AY), waxay gaarayaan 68 qof, kuwaasoo kala ah :

a) Shaqaale Kasoo shaqeeyay Barlamaanka Federaalka Soomaaliya muddadii ka horreysey Agoosto,2012 oo tiradoodu ahayd 17 qof oo u dhiganta 13% shaqaalaha hadda ka howlgala B.F.S.
b) Shaqaale la qoray (Sebteembar,2012 –Juun, 2013), waqtigii barlamaanka hadda jira la dhaariyey ka dib kuwaasoo tiradood tahay 51 qof 40% shaqaalaha guud ee imminka ka sahqeeya B.F.S.

- Dhinaca kale, tirakoobta shaxdan hoose waxay xambaarsan tahay isla markaana tilmaameysaa shaqaale joogta ah oo darajoodu B/F (sitayaasha shahaadada D/ga sare ama kuwa farsamada),kuwaasoo tiradooda dhan tahay 21 qof oo isugu jira:
  a) Shaqaale joogto ah ee kasoo shaqeeyay B.F.S. xilligii u dhexeeysay (Oktoobar 2007 - Agoosto,2012),kuwaasoo tiradoodu tahay 20 qof oo u dhiganta (16%) markii loo eego shaqaalaha guud ee B.F.S.
  b) Shaqaale kale oo joogto ah ee ka howlgalayay B.F.S. waqtigii u dhexeyay (Oktoobar 2007 - Agoosto,2012), kuwaasoo tiradoodu dhantahay 1 qof una dhigma (0.80%) marka loo eego shaqaalaha guud ee B.F.S.
- Waxaa xusid mudan, in shaqaalaha joogtada ee B.F.S. ay ka mid yihiin shaqaale darajoodoodu tahay C/X (karraniyayaal iyo xirfadle) oo tiradoodu tahay 4 qof oo u dhiganta (3.80%)marka loo fiiriyo tirada shaqaalaha guud ee B.F.S. kuwaasoo ka howlgalayay B.F.S.xilliyo kala duwan, kuna soo kala biiray muddadii u dhexeysay (Oktoobar 2007 - Juun,2013).
- Sidoo kale , waxaa kale oo jira shaqaale joogta ah oo darajadoodii tahay D/K-X (shaqaale aan aqoon gaar ah looga baahneyn iyo kuwa ah kaaliye xirfadle) oo tiradoodu gaareysa 34 qof una dhiganta (26%) marka la tixgeliyo tirada guud ee shaqaalaha B.F.S. , kuwaasoo ka soo shaqeeyaya B.F.S.muddadii ka horreysay baarlamaankan iyo imminka intaba (Oktoobar 2007 - Juun,2013).

- Guud ahaan, waxaa muuqata in shaqaalaha ugu badan B.F.S ay yihiin kuwa darajadoodu tahay A/Ay iyo D/K-X oo kala ah 68(53%) iyo 34 (26%) kuna aaddan sida ay isugu xigaan.

Shax lamb(4): Xaaladda shaqaalaha Baarlamaanka F. S ee joogtada ah oo u kala baxsan heerarka darajooyinkooda iyo jinsiga (lab/Dhiddig) **(Oktoobar 2007 - Juun,2013).**

Tix Lamb	Heerka Darajooyinka	Sannadihii Shaqada La qoray Shaqaalaha	Tirada		Isugeyn	%
			Lab	Dhed.		
1.	A/AY	Oktoobar 2007 - Agoosto,2012	13	4	17	13%
		Sebtembar,2012 –Juun, 2013	47	4	51	40%
2.	B/F	Oktoobar 2007 - Agoosto,2012	17	3	20	16%
		Sebtembar,2012 –Juun, 2013	-	1	1	1%
3.	C/X	Oktoobar 2007 - Agoosto,2012	4	-	4	3%
		Sebteembar,2012 –Juun, 2013	-	1	1	1%
4.	D/K-X	Oktoobar 2007 - Agoosto,2012	2	9	11	8%
5.		Sebteembar,2012 –Juun, 2013	-	23	23	18%
Wadar Guud			83	45	128	100%
%			**65%**	**35%**	**100%**	

Xigasho: waxaa isku duway Tirakoobtani Kooxda La-talinta Farsamda ee Kheyraadka Aadamiga ee BFS (Juun 2013)

GABOGABO

Hadii aan dib u eegno falanqeynta tirakoobta shqaalaha Baarlamaanka F.Soomaaliya (B.F.S) ee sare ku xusan, waxaa kasoo if baxaya arrimo badan oo muhim ah oo in hoosta laga xarriiqo mudan. Waxaana ka mid ah:

1. In shaqaalaha B.F.S guud ahaan uu ku yimid koror aad u weyn dhanka shaqada iyo shaqaalaha, kaasoo gaaraya 69% xilliga baarlamaankan cusubi jiry oo keliya .Arrintani, waxay dalbeysaa in Barlamaanka Federaalka Soomaaliya uu si deg deg ah ugu helo xafiisyo, agab iyo qalab ay ku

shaqeeyaan shaqaalahaasi si looga faa'iideeysto horumarinta iyo hagaajinta waxqabadka barlamaanka .

2. In shaqaalaha B.F.S guud ahaan ay da'dooda u badan tahay dhallinyaro iyo aqoonyahanno cusub oo dhowaan ku soo biiray B.F.S. kuwaasoo dhan (66%).Arrintaani, waxa ka dhalanaya baahi weyn oo loo qabo tababaridda shaqaalahaasi cusub dhallinyarada aqoonyahanka ah oo intooda badan da'doodu ka yartahay 40 sano, si loo kordhiyo aqoontooda , xirfaddooda iyo awoodooda wax-qabad (KSA) iyo waaya-aragnimadooda shaqo intaba, ka dibna ay dowr weyn ka qaataan sii hormarinta Baarlamaanka .F.S waqtiyada soo socda.
3. Tirakoobtani , waxay muujineysaa in nuqsaan weyn ay ka jirta, aadna u yar yihiin shaqaalaha heerka dhexe iyo farsamayaqaannada loo baahan doono mustaqbalka,gaar ahaan, marka la dhammeeyo mashruuca dhismaha xarunta cusub ee B.F.S. goortaasoo shaqada B.F.S. ay si xoog leh ay u ballaaran doonto Insha Allaah.
4. Natiijada falanqeynta tirakoobta sare ku xusan, waxay daaha ka rogtay in tirada haweenka ka shaqeeya B.F.S. ee la qoray muddadii u dhexeysay (Sebteembar, 2012 - Juun,2013). Ee Baarlamaankani jiray, ay tiradoodu gaartay (38%), taasoo ah saami weyn oo lagu farxo, dhiirigelin leh, isla markaana gacan weyn ka geysan doonaan horumarinta Baarlamaanka, shaqaalaha iyo howlwadeenada kale ee B.F.S. mustaqbalka dhaw.
5. Ugu dambeyn, guud ahaan tirada guud ee shaqaalaha B.F.S. waxay tahay 128 qof **(Juun,2013)** kuwaasoo kala ah:
    a. 83 (65%) Lab; halka 45 (35%) ay yihiin Dhiddig, iyadoo dhanka kale 42 (51%) ay yihiin shaqaale la qoray mudaddii u dhexeysay (Oktoobar 2007 - Agoosto,2012) halka 76 (59%) ay yihiin kuwo la shaqaaleeyay mudaddii u dhexeysay (Sebteembar,2012 –Juun, 2013); halkaas waxaa laga fahmi karaa in labada xillli uu farqi weyn u dhexeeyo, lagana dheehan karo siyaasadda cusub ee Barlamaanka Qaranka iyo Istarateejiyada iyo isbeddelka la maaggan yahay waqtiyada so socda.

Annex 2.

MACLUUMAAD KU SAABSAN

GUDDIYADA BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Si loo helo xog iyo macluumaad ballaaran oo ku aaddan waxqabadka, caqabadaha iyo baahida shaqaale ee guddiyada baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ay qabaan iyadoo si gaar ah loo eegay hawlihii guddiyadu soo qabteen iyo xaaladihii jirey mudadii uu socday kalfadhiga labaad. Waxaa lataliyayaasha farsamo ee Kheyraadka

Aadamiga (Human Resource Technical Advisors), ay isticmaaleen habka adeegsiga *Wareystayayaal* ***(Questionnaires) (eeg lifaaqa koowaad).***

Guddiyada B.F.S. ee wareysiga laga qaaday waa kuwa hoos ku qoran:

1) Guddiga Difaaca ee Baarlamaanka
2) Guddiga Xaqiiqo Raadinta, Dib-u-hishiisiinta & Hanti isku Celinta
3) Guddiga Dhaqaalaha, Warshadaha & Ganacsiga
4) Guddiga Waddooyinka, Gaadiidka, Dekadaha, Garoomada & Tamarta
5) Guddiga Kheyraadka Dabiiciga & Bii'ada
6) Guddiga La-socodka & Dib-u-eegidda Dastuurka
7) Guddiga Maaliyadda, Miizaaniyadda & La-xisaabtanka Hay'adaha Dowladda
8) Guddiga Beeraha, Xoolaha, Horumarinta Reer Miyiga & Kheyraadka Badda
9) Guddiga Arrimaha Dibadda & Iskaashiga Caalamiga
10) Guddiga Arrimaha Gudaha & Amniga
11) Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada
12) Guddiga Warfaafinta, Dhaqanka, Boostada & Isgaarsiinta
13) Guddiga Garsoorka Arrimaha Diinta & Awqaafta
14) Guddiga Xuquuqul Insaanka, Haweenka & Arrimaha Bani'aadanimada
15) Guddiga Xeer-hoosaadka, Anshaxa, Xasaanadda, & Daryeelka Xildhibaanadda

Ka dib markii ay soo buuxiyeen, soona gudbiyeen *Wareystayayaasha* horay loogu qeybiyay, waxaa *La-taliyayaasha Farsamada ee Kheyraadka Aadamiga* ku dhaqaaqeen iney u howl galaan isku duwidda & falanqeynta warcelintooda, waxaana u soo if-baxay arrimaha hoos ku qoran:

A. Howlaha U Qabsoomay Guddiyada Muddada Kalfadhigaan

I. ***Habaynta Hawlaha Guddiyada****, Maadaama guddiyada dhammaantood ay shaqada ku cusub yihiin oo mar dhow la dhisay, waxaa muhiim u ahayd guddiyada iney is habeeyaan. Waxayna ku dhaqaaqeen arrimaha soo socda:*

i. Guddiyada waxay iska dhex doorteen guddoonkooda oo ka kooban guddoomiyaha, guddoomiye ku xigeenka iyo xoghayaha guddiga.

ii. Guddi kasta waxuu sameystay qorsho howled shaqo ee u gaar ah iyagoo qaarkoodna ay isu qeybiyeen guddi hoosaadyo.

iii. Guddiyada qaar waxay sameysteen Miisaaniyad ay hawshooda ku fushadaan, hasa-yeeshee ay wali sugayaan iney u soo baxdo ama loo oggolaado .

iv. Guddiyada qaar waxay sameysteen Anshax-howleed (Code of Conduct).

II. **Kormeerka hay'adaha,** Hawsha ugu weyn oo guddiyada Barlamaanku u xilsaaran yihiin waa kormeerka iyo la xisaabtanka hay'adda fulinta; sidaas darted ayaa guddiyadu waxay bilaabeen iney:

i. kormeer ku sameeyaan wasaaradaha & hay'adaha ay shaqada la-lahaayeen

ii. Waxay la kulmeen safaaradaha qaarkood, iyagoo kala hadlay xaaladaha qaxootiga soomaaliyeed ee ku sugan dalalkooda

iii. Kormeer shaqo ku soo sameeyeen goobo muhiim ah sida: Isbitaalada, Dugsiyada, Dekadda, Is-kaashatooyinka, Xabsiga dhexe, Idaacadda & Telefeshinka, Maxjarka, Rugta ganacsiga, Garoonka Diyaaradaha ee *Aadan Cadde*……iwm

III. **Wada shaqaynta Guddiyada iyo Hay'adaha,** Waxaa aad muhiim u ah in hay'ada fulinta iyo guddiyada Barlamaanka uu dhexmaro xiriir fiican oo abuurikara is faham, is aamin iyo shaqo wadareed. Sidaas darted guddiyadu:

i. Waxay ka codsadeen si rasmi ah hay'adaha ay la shaqeeyaan qorshe howleedkooda, tirada shaqaalahooda (kuwa joogtada ah & kuwa aan joogtada ahayn).

ii. Guddiyada qaarkood waxay uga yeereen baarlamaanka F.S. wasiirrada & masuuliyiinta kale ee hay'adaha si ay wax ugu weydiiyaan howlaha ay qaranka u hayaan.

IV. **Qaban qaabin iyo ka qaybgal shirar**

i. Guddiyada waxay ka qeyb galeen shirar kala duwan ee Dalka gudihiisa & dibaddiisa lagu qabtay.

ii. Shirweynihii Qaranka ee dib-u-habeynta Garsoorka.

iii. Waxa kale oo la qabtay shirweyn oo looga hadlay xuquul insaanka oo ay ka soo qaybgaleen dhawr boqol oo qofood.

V. **Ka qaybgalka dibuheshiisiinta iyo dhismaha maamullada**

i. Guddiyada waxay ka qeyb-qaateen xallinta khilaafyo & muranno shaqo ee meelaha qaarkood ka jiray.

ii. Guddiyada waxay ka qaybgaleen galeen dib-u-hishiisiinta & maamul u sameynta gobollada qaarkood sida Bay, Bakool iyo G/Guduud.

VI. **Samaynta Shuruucda iyo dibu-eegiidda Dastuurka,** Arrin aad muhiim u ah oo guddiyada barlamaanka laga rabo waa samaynta shuruucda

dalka iyo dibuhabaynta Dastuurka, taasoo ay ka qabteen arrimaha soo socda:

i. Guddiyada waxay bilaabeen Doodda & Dib-u-eegista Dastuurka iyadoo la sameeyey shir lagu daahfuray in shacabka Soomaaliyeed oo dhami ka qayb qaato wax ka beddelka Dastuurka.

ii. Guddiyada waxay diyaariyeen sharciga Xasaanadda & daryeelka xildhibaanada.

iii. Guddiyada waxay diyaariyeen warbixin ku aaddan isbedelka *Shilinka Soomaaliga.*

iv. Guddiyada waxay darseen talana ka soo jeediyeen sharciyo, iyadoo guddiyada qaarkood ay sheegeen in ay dib-u-celiyeen sharciyada qaarkood, kuna sababeeyeen in aaney dastuurka waafaqsaneen.

B. Caqabadaha Saameynta ku leh Shaqada Guddiyada B.F.S.

I. ***Xafiisyada lagu shaqeeyo:*** *Barlamaanku waqtigan xaadirka ah mahaysto xafiisyo munaasib ah oo lagu shaqayn karo maaddaama xaruntii horena ay dunsan tahay mid cusubna aan weli la dhisin. Sidaas darted guddiyada Barlamaanku ma haystaan xafiisyo ay shaqadooda ku qabsan karaan. Taasi waxay xildhibaannada ama guddiyada u keentaa iney ku adkaato iney kulmaan si ay shaqo u qabtaan. Guddiyadu waxay hadda ku shaqeeyaan si iskaa wax u qabso oo kale ah iyagoo xarunta barlamaanka meelaha kooban oo lagu shiri karo kala sugta.*

II. ***Agab & qalab lagu shaqeeyo:*** Waxaa yar oo aad u kooban agabka iyo qalabka lagu shaqeeyo sida waraaqaha, kombiyuuterrada, Qalabka daabacaadda iwm. Kuwaas oo haddii shaqo la qabanayo lagama maarmaan ah guddiyaduna ay aad ugu baahan yihiin.

III. ***Miisaaniyad & Dhaqaale la'aan:*** Guddiyada waxay aad uga cabanayaan ineysan jirin miisaaniyad loogu tala galay in lagu fuliyo shaqada guddiyadka waxa yar ee guddoonka ka soo gaarana aysan waxweyn u qaban Karin.

IV. ***Guddiyada oo aan lahayn Gaadiid & Isgaarsiin:*** Gaadiidka iyo isgaarsiintu waa muhiim, guddiyaduna waxay sheegayaan iney ka mid yihiin caqabadaha shaqadooda hortaagan. Arrin aad muhiim u ah baahi weynina ay ka jirto waa helitaanka internet waxtar ah oo shaqada loo adeegsan karo, kaas oo dhab ahaan waxtar weyn u yeelan lahaa barlamaanka iyo guddiyadaba.

V. ***Wada-shaqeynta Guddiyada iyo hay'adaha dawladda qaarkood oo aan wanaagsaneyn:*** Guddiyada qaarkood waxay aad uga sheegteen hayadaha oo aan tixgelintii iyo xushmaddii ay mudnaayeen siin

iyagoo aan kasoo jawaabin waraaqaha ay u qoraan iyo waxyaabaha kale oo ay weydiiyaan. Mararka qaarkoodna meermeeriya marka ay shaqo uga baahdaan, una muujiya kalsooni darro.

VI. ***La'aanta Shaqaale khibrad iyo waaya aragnimo leh:*** Waxaan jirin shaqaale khibrad leh oo kaabi kara shaqada guddiyada

gaar ahaan takhasusyada uu guddi waliba u baahan yahay sida: *la-taliyayaal sharci, dhaqaale, xisaabeed, injineero, ICT, maareyn/maamu.*

VII. ***Shirarka Barlamaanka iyo kuwa Guddiyada oo aan isku dhaca: Shirarka*** Barlamaanka iyo guddiyada oo aan la kala maareyn keentana mararka qaarkood fadhiyada baarlamaanka F iyo guddi hoosaadyada oo isku soo aada taas oo markeeda keenta in fadhiyada guddiyada la baajiyo, ama xubnaha qaarkood oo ku kala fadduuma oo qaarna aada shirka barlamaanka qaarka kalena ay aadaan shirka guddiga.

VIII. ***Amniga:*** Waxaa jirta in dhaqdhaqaaqa xildhibaannadu uu inta badan xaddidan yahay iyadoo aan meel kasta la tegi Karin goor kastana aan la socon Karin inta bandanna aan xildhibaannado kaashan Karin ilaalo hubaysan. Gobollo iyo degmooyin badan oo mudnaan lahaa in xildhibaannadu ay hawlo ka soo qabtaan amaba ay lasoo kulmaan bulshada degaannada suurto gal ma aha in la tago sababo nabadgelyo la'aan darted.

IX. ***Safarada guddiyada gudaha & dibadda oo aan dhaqaale loo haaynin:*** Inkasta oo arrimaha amniga dartood aan meelo badan la tegi Karin, bulsho badan oo xaq u leh iney xildhibaannadu soo booqdaanna aan loo tegi Karin haddana meelihii koobnaa oo ay suurtagalka ahayd in la tago waxaan loo hayn dhaqaale loo adeegsado safarrada ama booqashooyinkaas dalka iyo debeddaba.

X. ***Guddiyada qaarkood oo aan khibrad & tababar u lahayn shaqadooda:*** Guddiyada qaar badan oo ka mid ah waxay sheegeen ineyan shaqada ay hayaan wax aqoon iyo khibrad ah midna u lahayn sidaas darteedna ay u baahan yihiin in iyagana shaqadooda loo tababbaro khubaro aqoon gaar ah u lehna lagu soo kordhiyo.

XI. ***Tixgelin la'aanta guddiyada dhanka xukuumadda:*** Shaqada Barlamaanku waxay u kala qaybsan tahay guddiyada Barlamaanka taas oo guddi kastaa uu leeyahay shaqo u gaar ah haseyeeshee waxaa dhacda in xukuumaddu ay shaqooyin si wada jir ah ugu dirto xubno ka tirsan golaha wasiirrada iyo xubno ka tirsan Barlarlamaanka iyagoo aan tixgelin siin guddiyadii barlamaanka oo shaqadaas u xilsaarnaa, iskana xusha ciddii ay doonaan.

C. Baahida Shaqaale (Human Resource needs)

Guddiyada Barlamaanku waxay muujiyeen iney jirto baahi weyn ee xagga khayraadka aadamiga amase xoogga shaqo oo ay u baahan yihiin iyagoo sheegay iney u baahan yihiin shaqaale badan oo takhasus iyo khibrado gaar ah leh. Xirfadaha, khibradaha iyo takhasusyada ay si gaar ah u tilmaameen waxa ka mid ah:

I. ***Cilmi-baarayayaal (Researchers):*** Guddiyadu waxay caddeeyeen in baahi weyn loo qabo in uu barlamaanku yeesho qayb cilmi baaris oo guddiyada iyo ciddii kale oo daneyneysaba ay u irkan karaan ama kaalmaysan karaan, guddiyadana ay si gaar ah uga faa'iideysan lahaayeen.

II. ***Khubaro kala duwan:*** Guddiyada intooda badan waxay aad ugu tiiqtiiqsadeen baahida loo qabo in la helo dad khubara ah oo si gaar ah loogu soo tababbaro aqoonta iyo takhasusyada barlamaanku u baahan yahay iyadoo weliba laga faa'iideysanayo waaya aragnimada barlamaannada dalalka kale. Khubarada ay sheegeen in loo baahan yahay waxa ka mid ah:

   i. Khabiir xaga Deegaanka & Bii'ada
   ii. Khabiir xaga Dhaqaalaha
   iii. Khubaro Aqoonta ICT leh
   iv. Khubaro Arimaha Warbaahinta
   v. Khubaro arimaha Bulshada
   vi. Khubaro Arrimaha Ciidanka
   vii. Khubaro Maaliyadeed
   viii. Khubaro Maamul
   ix. Khubaro Nabad Galyo & Dib-u-heshiisiin
   x. Khubaro xaga Isgaarsiinta & Dhaqanka
   xi. Khubaro xaga Shareecada Islaamka & Xeerka Madaniga
   xii. Khubaro xaga Tamarta & Civil Injineering
   xiii. Sharci yaqaano

III. Shaqaalaha kale

IV. Habmaamuus-yaqaan

V. Xeeldheerayaal xaga Kormeerka, Daba galka……. IWM

VI. Turjubaanno & Af-celiyayaal waayo arag ah (Soomaali-Carabi, Soomaali-Ingiriis, Soomaali-Faransiis)

VII. Xirfadlayaal kala duwan Karaaniyayaal & Xog-hayno

VIII. Shufeero/Makaanik

QEYBTA 2AAD: SOO-KOOBID WARBIXINTA HAWLAHA GOLAHA GUUD AHAAN

Munaasabadaha ugu muhiimsanaa

3dii Maarso 2013	Khudbadda R/Wasaaraha ee la xiriirta Barnaamijka waxqabadka Xukuumadda
9kii Maarso 2013	Bilaabidii Kalfadhigii 2aad Kulaliisa 5aad waxa Khudbad ka jeediyay Madaxweynaha JFS
29kii Juun 2013	Codsi Madaxweyne kordhin hal bil Shaqo
30kii Juun 2013	Madaxweynaha JFS ayaa Khudbad ka jeediyey Xiritaanka Kalfadhiga 2aad ee Golaha Shacabka.

QEYBTA 3AAD: HAWLAHA HIRGALAY KALFADHIGA 2-aad EE BAARLAMAANKA 9-aad EE SOOMAALIYA 2dii Maarso – 30kii Juun 2013

Hindise Sharciyeedyada iyo Mashaariicyada Sharci la horkeenay Golaha lana meelmariyey

29kii Juun 2013	Ansixinta Habdhowraha Golaha iyo Labadiisa Ku-xigeen
3dii Luulyo 2013	Ansixinta Sharciga lagu Dhisayo Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
8dii Luulyo 2013	Sharciga Maamullada Gobollada iyo Degmooyinka
20kii Luulyo 2013	Ansixinta Heshiiska Borotokoolka Iskaashiga iyo Tababarada Ciimadamada ee dhexmaray Soomaaliya iyo Turkey
24kii Luulyo 2013	Ansixinta Heshiiskii Contonou
29kii Luulyo 2013	Ansixinta Sharciga Shaqaalaha Arrimaha Dibedda

Hindise Sharciyeedyada Xukuumadda soo fasaxday si loo meelmariyo

3dii Maarso 2013	Hindise Sharciyeedka lagu Dhisayo Golaha Adeegga Garsoorka Akhrinta 2aad.
25kii Maajo 2013	Hindise Sharciyeedka lagu Dhisayo Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka – Akhrinta 2aad
25kii Maajo 2013	Hindise Sharciyeedka lagu Dhisayo Maxkamadda Dastuuriga Akhrinta 2aad
12kii Juun 2013	Hindise Sharciyeedka Maalgashiga Shisheeye – Akhrinta 2aad
27kii Luulyo 2013	Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka – Akhrinta 2aad
29kii Luulyo 2013	Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka – Codeyn ayuu sugayaa
15kii Juun 2013	Hindise Sharciyeedka Kaluumeysiga – Codeyn ayuu sugayaa
31ka Luulyo 2013	Hindise Sharciyeedka Sumadda Ganacsiga – Akhrinta 1aad

Hindise Sharciyeed Xukuumadda dib ula nogotay

25kii Maajo 2013	Hindise Sharciyeedka La-dagaalanka Argagixisada

Hindise Sharciyeed la horkeenay Golaha lana diiday

15kii Luulyo 2013	Hindise Sharciyeedka Xafiiska Adeegga Gardoonka (Ilaaliyaha Dadweynaha)

Warbixanada la horkeenay Barlamaanka lana Aqriyaay

31dii Maarso 2013	Xil. Nuur Faarax Jaamac - Warbixin Gobolka Galgaduud
31dii Maarso 2013	Xil. Mahad Maxamed salaad Warbixin Gobolka Hiiraan
31dii Maarso 2013	Xil. Sacdiye Careys Ciise Warbixin Puntland
1dii Abriil 2013	Xil. Abdulahi Sheekh Isma'il Warbixin G. Shabeellada Hoose
1dii Abriil 2013	Xil. Dahir Amiin Jeesow Warbixin G. Shabeellaha Dhexe
1dii Abriil 2013	Xil. Aweys C/laahi Warbixin G. Bay iyo Bakool

10kii Maarso 2013 Warbixin uu soo jeediyay Wasiirka Caddaaladda iyo Garsoorka

10kii Abriil 2013 Warbixin uu soo jeediyay Wasiirka Maaliyadda ee ku saabsan xisaab Xirka Saddexda bilood ee lasoo dhaafay Jan, Feb iyo March

Ansixinta Miisaaniyadda

1da Agoosto 2013 Ansixinta Kabidda Miisaaniyadda **148 Cod**

Soojeedinta (Moshin) la horkeenay Baarlamaanka

6dii Abriil 2013 U yeerid Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Qaranka in uu hor yimaado Golaha Shacabka si su'aalo looga waydiiyo arimaha la xiriira Amniga Dalka.

5tii Maajo 2013 Soojeedin kalsooni kala noqosho Xukuumadda (soojeedinta waa la diiday)

21kii Maajo 2013 Mooshin ka dhan ah ciidamada Kenya ee Jubbada Hoose

24kii Luulyo 2013 Mooshin talo soojeedin wax ka badalida qodob ka mid ah Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka Soomaaliya

28kii Luulyo 2013 Soo jeedin in la dadajiyo samaynta shuruucdii Axsaabta Siyaasadeed

Su'aal Oraaheed laga jawaabay

20kii Abriil 2013 Su'aalo la weydiyay R/Wasaaraha lana xiriirtay wax qabadka Xukuumadda uuna ka jawaabay

21kii Abriil 2013 Su'aalo la xiriiray Aminga Qaranka oo la weydiyay Wasiirka Amniga Qaranka iyo Arrimaha Gudaha uuna kajawaabay

22kii Abriil 2013 Su'aalo la xiriiray ciidanka XDS oo la weydiyay Wasiirka Gaashaandhigga uuna ka jawaabay

Hadaljeedin Guddoonka iyo Guddiyada Golaha Shacabka

9kii Maarso 2013	Warbixnta Gudoomiyaha ee ku saabsan Shintiriska Guddiyada ku shaqaynayaan
2dii Abriil 2013	Warbixinta Wax qabadka Guddiyada ee Wax kabadalida Xeer Hoosaadka
6 dii Abriil 2013	Warbixinta Howl-qabadka Guddiyada
11 kii Abriil 2013	Warbixinta Guddiyada ee la xariirta Ka cudur daarashada Dukuminti Ka qaldamay Wasaarada Maaliyadda
13 kii Abriil 2013	Soojeedin G/Golaha Shacabka lan xariirto in aan la baari Karin Xildhibaanka jirkiisa
16 kii Abriil 2013	Warbixinta Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Warshadaha
23 kii Abriil 2013	Hadaljeedinta G/golaha shacabka ee la xariirto shirka u socdo Soomaaliya iyo soomaali land
27 kii Abriil 2013	Hadaljeedinta G/golaha Shacabka ee la xariito Mooshin ay soo Gudbiyeen Xildhibaanada oo ku saabsan hashiiska Soomaaliya iyo Soomaaliland
18 kii Maajo 2013	Hadaljeedint G. Golaha shacabka ee la xariirto ka maqnaashada Xildhibaanada Fadhiyada
21 kii Maajo 2013	Talo soojeedin Guddiga Maaliyadda iyo Lacagta la xariirto in la Ansixiyo Miisaaniyadda
1 dii Juun 2013	Hadaljeedinta G. Golaha Shacabka la xariirto in ay mamnuuc tahay in lagu garab furo shirka Barlamaanka shirarka Guddiyada
10 kii Juun 2013	Hadaljeedinta G. Golaha Shacabka la xariirto dhibaatada haysata Soomaalida ku nool Koonfur Africa

Hadaljeedinta Martida Golaha:

30kii Juun 2013	Guddoomiyaha Gobalka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho
30kii Juun 2013	Guddoomiyaha Gobolak Bay
30kii Juun 2013	Guddoomiyaha Barlamaanka ee Dowlad Goboleedka Puntland
30kii Juun 2013	Guddoomiyaha Barlamaanka ee Dowlad Goboleedka Galmudug

30 Juun 2013 Wasiirka Arrimaha Diinta iyo Dhaqanka ee Dalka Djibuuti

Qaraarada la horkeenay Golaha laga dooday lana ansixiyey

16kii Maajo 2013 Qaraarka ka mid noqoshada Ururka Barlamaanka Adduunka ee (International Parliamentry Union – IPU)

Dhaarin xubnaha cusub ee Barlamaanka

31kii Maarso 2013	Xil. Siyaad Maxamuud Shire
31kii Maarso 2013	Xil. Sheekh Nuur Cali Aadan
18kii Maajo 2013	Xil. Bashiir Maxamed Jaamac
18kii Maajo 2013	Xil. Xasan Maxamuud Jaamac
29kii Maajo 2013	Xil. C/weli Maxamed Qanyare